

1. Hordhac

NemID waa xal loogu tala galay si aad ugu isticmaasho netbank, xafiisyada dowlada iyo websaydyada dadka caadiga ay leeyhin. NemIDga waxaad kaloo ku isticmaali kartaa marki aad rabto inaad si digitaal wax u saxiixdo.

NemIDgu wuxuu ka kooban yahay, magaca aad ku galeyso (bruger-id), kood (adgangskode) iyo furaha kaarka (nøglekort) kaas oo ku siinaya furo aad halmar isticmaaleyso (furo) waxaadna la istmaaleysa magaca aad ku galeyso iyo koodka.

Xalka IVR (Interactive Voice Response) waxaa laguugu soo dirayaa furayaasha talefoonkaaga.

Waxaad sidoo kale telefonkaaga ama tablet-kaaga (ipad) ku soo degsan kartaa NemID nøgleapp oo aad u isticmaali kartid fure ahaan. Waxaa sidoo kale muhiim inaad meel fiican ku xafidatid kaar-furahaaga waraaqda ah (nøglekort) si aad u isticmaashid haddii app-ku kuu shaqayn waayo ama cilad farsamo ku dhacdo telefonkaaga.

Hadii aad u isticmaaleyso NemIDga saxiixyada loogu talagalay xafiisyadaq dowlada waa inaad ku lifaaqdaa shahaadada OCES (Offentlige Certifikater til Elektronisk Service).

Hadii aad rabto inaad u isticmaasho NemIDga bankigaaga oo kaliya waxaa ku qusaya sharciyada ku yaala qodobada 2aad iyo 3aad, mar walba waxay ku xiran tahay hishiiska aad la gashay bankigaaga. Sharciyada iyo masuulka ku saran waxaad ka aqrisan kartaa hishiisyada aad la gashay bankigaaga.

Hadii aad u isticmaaleyso NemIDga saxiixyada elektrooniga ee loogu tala galay xafiisyada dowlada waxaa ku qusaya sharciyada ku qoran qaybta 2aad, 3aad iyo 4aad.

Sharciyadaas waxaad ka heli kartaa www.nemid.nu.

Nets DanID waxay ka dhagan tahay Nets DanID A/S Cvr. 30808460.

Shayga aad ku isticmaalayso NemIDga waxaa loo fasirikaraa PC, Mobiltelefon ama Tablet.

2. Falalka la adeeco

Sixiixa isticmaalka NemIDga wuxuu la mid yahay sida adiga oo ku saxiixay gacantaada, sidaa daraadeed marka aad saxiixdo sharci ahaan waa wax ku qabanaya.

3. Sharciya Qusuyo isticmaalka NemIDga

3.1 xiriirka isticmaalka NemID

Markii aad isticmaaleyso NemIDga waxaa sharci ah inaad bixiso wabixin sax ah.

3.2 ilaalinta bruger.id, adgangskode og nøglekort/nøgleviser/Nøgleapp

Waa inaad ka taxadartaa waxyaabaha hoos ku qoran:

- Waa inaad dayicin magaca aad ku galeyso (bruger-id), koodka (adgangskode) iyo furaha kaarka/furo tusaha (nøglekort/nøgleviser)/ lambarkaaga sirta ee nøgleapp-ka si aynan dad kale u isticmaalin.
- Waa inaad dad kale usheegin koodkaaga ama aadan siin furaha kaarka (nøglekort) ama lambarka sirta ah ee ku gashid nøgleapp.
- Waa inaad sawrin ama koobi garayn kaarka furayaashaada.
- Waa inaad meel ku qorin koodkaaga ama lambarkaaga sirta ah ee nøgleapp.
- Waa inaad isku meel ku xafidin koodkaaga iyo kaarka furayaasha ama aadan ku dul qorin koodkaaga kaarka furayaasha ama telefoonka uu ku degsanyanay nøgleapp.
- Nøgleapp-ka ku soo degso ama ku isticmaal telefonkaaga khaaska ah keliya

3.3 amaanka isticmaalka

Waa inaad hubisaa waxyaabaha hoos ku qoran:

- magaca aad ku galeyso (bruger-id), koodkaaga (adgangskode), kaarka furayaasha (nøglekort/nøgleviser) iyo nøgleapp waa inuusan isticmaalin qofaan adiga ahayn.
- Marki aad isticmaaleyso waa inaad lambarkaaga sirta ah ka qarisaada dadka kale si aysan kuula isticmaalin.

- Marki aad isticmaaleyso NemIDga waa inuu PCga ama sheyga aad ku isticmaaleyso uu lee yahay borogaramkii ugu danbeeyay.

Mar walba waa inaad la socataa si uu san kaaga lumin kaarka furayaasha (nøglekort/nøgleviser) ama telefonkaaga aad ka isticmaalshid nøgleapp oo aysan dad kale u isticmaalin. Taana waxaad kala socan kartaa inaad gasho boga nemidga www.nemid.nu oo aad eegto in lagu isticmaalay meelo aadan adigu uisticmaalin.

3.4 Koodka ku meel gaadhka ah

Hadii aad ku cusub tahay netbanka waxaad heli kartaa kood ku meel gaadh ah oo aad ku gasho marki aad galeyso NemID.

Hadii aad xirto koodkaaga waxaad heli kartaa kood ku meel gaadh ah. Fiiri qodobka 3.5 oo ku saabsan xirtaanka.

Hadii aad ka shakido waraaqda koodka ku meel gaadhka waa inaad la xirirtaa DanID ama bankigaaga si lagu siiyo koodo cusub oo ku meel gaadh ah.

3.5 Xiritaanka

3.5.1. Masuuleyad kaa saaran inaad xirto markaba

- Waa inaad xirtaa isla markiba furaha kaarka (nøglekort) hadi aad ka shakiso inuu helay qof kale ama uu ogaaday furayaasha kaarka tusaale ahaan hadi ay furan tahay waraaqda kaark furaha.
- Hadii waraaqda laguugu keenay fura tusaha ay furan tahay.
- Hadii ay kaa lumaan karaka furaha (nøglekort) iyo fura tusaha (nøgleviser) hadi aad dib u heshana waa inaad jeexjexda ama jijibisaa.
- Waa inaad xirtaa nøgleapp-kaaga, haddii telefanka uu kuugu degsanyahay ama aad ka isticmaasho uu kaa dhumo, ama aad ka shakidid in nøgle-app-kaaga qof kale kula isticmaalo, ama qof kale telefonkiisa ku soo degsado nøgleapp isagoo adeegsanayo NemID-gaaga.
- Hadii aad ka shakiso in koodkaaga uu ruux kale haysto ama arkay waa inaad xidhaa, ama hadi kale waa inaad isla markiba ka badeshaa boga nemidga www.nemid.nu.

3.5.2 Meesha aad la xiriireyso marki aad xireyso

Marki aad xireyso koodkaaga ama karaka furaha iyo furo tusahaba (nøglekort/nøgleviser) waa inaad sheegtaa adareeskaaga iyo Cpr. Nrkaaga ama magaca aad ku gasho NemID, ama nrka dusha oga qoran karaka furaha (nøglekort) ama furo tusaha (nøgleviser) ama nøgleapp-kaaga.

Isla markaana waa inaad usheegtaa sheyga aad xireyso inu yahay koodkaaga, karaka furaha (nøglekort) ama furo tusaha (nøgleviser) ama nøgleapp-ka.

Marki aad xirso koodkaaga Nets DanID waxay kuu soo direysaa cadeyn sheegeysa waqtiga iyo sababta aad u xirtay.

Waxaad ka xiri karta koodkaaga kaarka furaha (nøglekort) iyo furo tusaha (nøgleviser) iyo nøgleapp-ka meelah hoos ku qoran:

- Waxaad gali karta boga www.nemid.nu (24 saac), ama wac tlf nr: 72247010 (24 saac).
- Waxaad la xiriiri kartaa bankigaaga ama borgerservice-ka hadi aad leedahay NemID aad kula xiriirto xafiisyada dowlada.
- Boga www.nemid.nu waxaad mar walba kala socon kartaa waqtiga iyo sababta aad u xirtay koodkaaga, kaarka furaha (nøglekort) iyo furo tusaha (nøgleviser) iyo nøgleapp-kaaga.

3.5.3 Sababta ay uxiri karto Nets DanID

Xiritaanka NetsDanID aga:

- Hadii ay ka shakiso Nets DanID inuu qof kale isticmaalayo koodkaaga.
- Hadii aad dhowr jeer qalado koodkaaga.
- Furaha karka (nøglekort) iyo furo tusaha (nøgleviser) ama nøgleapp-kaaga
- Hadii Nets DanID ay ka shakido ama ogaato in telefonka aad ka isticmaasho nøgleapp-ka barnaamijyada ku jiraa yihiin kuwo aan la isku halayn Karin ama aan amaan ahayn.
- Hadii ay Nets DanID ka shakiso inuu qof kale ogyahay furayaashaada.

Sharciyada NemID ee loogu tala galay netbankiga iyo saxiixyada digitalka ee xafiisyada dowlada

- NemID: hadi Nets DanID ogaato inaad ilaalin sharciyada ku qoran qeybta 3aad.
- NemID: hadi Nets DanID loo soo sheego inaad dhimatay.

3.5.4 Isticmaalka NemID marki aad xirto kadib

Ma isticmaali kartid NemIDga hadi NemIDga ama koodka la xidho. Hadi waxa la xiray uu yahay furaha kaarka(nøglekort) ama furo tusaha(nøgleviser) ama nøgleapp-kaaga bangiyada qaarkood waxay si xadidan kuug ogalaan karaan inaad netbankiga isticmaalto si aad u la socoto koontidaada.

3.6 Joojinta isticmaalka NemIDga

Waqti walba waad iska xiri kartaa NemIDga hadi aadan ubaahneyn inaad isticmaasho NemIDga. Firi qeybta 3.5.2 ee ku saabsan xiritaanka, la soco ama ogow inaad isticmaali karin adeega nemidga.

3.7 Macluumaadka Shakhsiyadeed

Hadi aad ka furatay NemIDga bankigaaga Nets DanID waxay isticmaaleysa macluumaadka shakhsiyadeed ayadoo ku hadleysa magaca bankiga. Nets DanID waxay isticmaaleysaa waxbixintaada shakhsiyadeed sida magacaaga, adareeskaaga iyo Cpr. Nrka si ay ku xaqiijiso. Waxayna isticmaaleysaa emailkaaga si ay kuugu soo dirto cadeymaha ku saabsan xiritaanka.

Hadi aad u qortay mobil tlfkaaga Nets DanID waxay u isticmaaleysaa inay kuugu soo dirto farimahaa tusaale ahaan koodka ku meel gaarka.

Marki aad isticmaaleysa NemIDga waxaa kaydsama faylal (logfiler) cadeynaya inaad komputarkaas ku isticmaashay NemID-ga, qofka isticmaalaya wuu tirtiri karaa feylashaas hadi ubaahan yahay.

Qeyb ka mid ah amaanka Nets DanID waxay diwaan galineysa waqtiyada, meesha aad ku isticmaaleysa ip adreeska iyo wixi warbixin kale ee la xiriirto komputarka aad ka soo gashay Nem ID.

Wixi faahfahhin ee ku saabsan feylashaas iyo amaanka waxaad ka aqrisan kartaa https://www.nemid.nu/dk-da/om_nemid/sikkerheden_bag_NemID/.

Hadi boga nem idga www.nemid.nu doorato inaad diwaan galiso meesha aad ku isticmaashay nem idga, Nets DanIDguna waydiwaan galineysaa shirkada aad ku isticmaashay, mar walba diwaan galinta waad iska joojin kartaa Nets DanID ma diwaan galinayaan meesha aad ku isticmaashay.

Nets DanID waxay keydinayaan warbixinta sanadkaas iyo 5 sano ee soo socota kadibna way tirtirayaan.

3.8 Shuruuda Nem ID

Marki aad Nem Idga ku isticmmaleyso netbankiga waxaa ku qusaya sharciyada aad la gashay bankiga marki aad furanaysay netbankiga. Hadi aad ku isticmaaleyso Nem IDga bogaga kale ee internetka waxaad la xiriireysa qolada leh bogagaas ama Nets DanID.

3.9 waxa u khaaska ah xalka IVR

Xalka IVRka waxaa loogu tala galay dadka indhaha la ama si qumaan wax u arag. Hadi laguugu soo dir furaha(nøgle) xalka IVRka taleefoonka laguugu soo dirayo furaha waa inuu waafaqsan yahay sharciyada hoos ku qoran:

- Waa inaad habsataa taleefoonka laguugu soo dirayo furaha inuusan shaqo ku laheyn komputarka ama taleefoonka aad ka isticmaaleyso Nem Idga.
- Waa inaad isla marki baa ad xirtaa furaha hadi uu kaa lumo taleefoonka laguugu soo diray furayaasha ama aad ka shakiso en khadka taleefoonka lagulu isticmaalayo.

3.10 Badilitaanka sharciyada isticmaalka Nem IDga

Nets DanID xaq bay uleedahay inay badasho sharciyada ayadoo cidna la socodsiin, marki ay tahay isbadal la xiriira shuruudaha amaanka ee qusaysa Nem ID.

Isbadalkaas wuxuu bilaabanayaa marki lagu soo qoro www.nemid.nu, wixi isbadal ah mar walbana waxaa lagu soo qorayaa www.nemid.nu 3 bilood ka hor inti aan la hir galin isbadaladaas.

4. Sharciyada gaarka ah ee quseeya saxiixyada xafiisyada dowlada (Offentlig Digital Signatur)

- Hadi aad doorato inaad u isticmaasho Nem Idga habka saxiixyada ee xafiisyada dowlada sharciyada qeybta 4aad waxay dhameystirayaan sharciyada qeybta 2aad iyo 3aad.
- Hadi aad rabto waxaad dalban kartaa Nem Id kala duwan islamarkaana waxaa lagu soo dirayaa kaarka furaha/furo tusaha (nøglekort/nøgleviser) iyo magaca aad ku galayso oo kala duwan si aad ugu isticmaasho netbankiga iyo saxiixyada xafiisyada dowlada.

4.1 Macluumaadka Shakhsiyadeed

Marki aguu siyo shahaadaada OCES (OCES Certifikat) oo la xiriirta Nem ID waxaad ogalaaneysaa markaas:

- Waxaad u ogalaaneysaa Nets DanID inay gasho keydka Cpr si ay magacaaga iyo adareeskaaga u hesho.
- Nets DanID waxay u gubineysaa macluumaadkaaga shakhsiyadeed ee u dhaxeeya saxiixaaga elektroniga iyo Cpr. Nr-ka *offentlig PID tjeneste* oo hoos tagta hay'adda dowladda u qaabilsan macluumaadka internetka ee Digitaliseringsstyrelsen. PID waxaa loo isticmaalaa xaffisyada dowlada si loo hubiyo inaad adiga tahay. Bogaga khaaska ah waxaa la ogeysinyaa Cpr. Nrkaaga hadi aad adigu ogalaato kaleya.
- Nets DanID waxay furineysaa boga PID hadi aad horay u saxiixday saxiix elektronik ah.

Marka aad Nem Idga ka qaadatay bankigaaga oo aad rabto inaad u isticmaasho saxiixyada elektroniga ee xafiisyada dowlada waxaad isla markaaba u ogalaaneysaa bankiga inuu siiyo macluumaadkaaga (magaca, adareeska, Cpr. Nrka, emailka iyo mobil taleefoonka) Nets DanID, si Nets DanID ku siiso una maamusho saxiixyadaada elektroniga ee xafiisyada dowlada.

Marka aad Nem Idga ka qaadatay xafiisyada dowlada oo aad rabto inaad ku isticmaasho netbankiga waxaad isla markaaba u ogalaaneysa Nets DanID inaysiiso warbixintaada bankiga si aad ugu isticmaasho netbankiga.

Hadi aad rabin in la gudbiyo warbixintaada shakhsiyadeed sida aan kor ku soo sheegnay waxaad samyn kartaa inaad xirto saxiixyada elektroniga ee xafiisyada dowlada. Taana waxaad kala xiriiri kartaa Nets DanID ama Borger Service ama inaad la xiriirto bankigaaga si aad uxirto netbankigaaga.

Hadi aad xirto saxiixa elektroniga ee xafiisyada dowlada Nem Idga waxaad ku isticmaali kartaa netbankigaaga.

Hadi aad xirto netbankiga waxaad Nem Idga ku isticmaali kartaa saxiixyada elektroniga.

4.2 Waajibaadka iyo masuulada ku saran marki aad ledahay saxiixa elektroniga ee xafiisyada dowlada ee wata shahaadada OCES

Waa inaad habsataa warbixinta ku saabsan magaca iyo emailka eek u qoran shahaadada OCES inay sax tahay.

Hadi wax isbadal ku yimaado warbixinta ku taal meesha tusaale ahaan magaca ood badasho waa inaad cusbooneysiisaa shahaadadaada OCES intaan la gaarin 30 cisho.

Hadi aadan cusbooneysin shahaadadaada OCES Nets DanID ay ogaato warbixintaada inay sax aheyn Net DanID waxay xireysaa shahaadadaada OCES.

Uma isticmaali kartid shahaadadaada OCES si aad dad kale ugu sameeyo shahaado.

4.3 Xiritaanka Shahaadada OCES

Nets DanID waxay xireysaa shahaadada OCES:

- Hadi aad adigu ka codsato Nets DanID.
- Hadi nets DanID ogaato inaad jabisay sharciyada Nem Idga. Hadi aad adigu iskaa xirto Nets DanID waxay kuu soo diraysaa cadeyn ah inaad xirtay waxay kuugu soo diraysaa emailkaaga waxaaq saxiixen ama adareeskaaga hadi ay hayaan hadi aysan heyn waxay waraaq kuugu soo dirayaan adareeska aad sisay. Hadi Nets DanID ay xirto adigoo ka codsan waxay kuu soo dirayaan email ama warqad ay kuugu sheegayaan sababta.

4.4 Cusbooneysiinta shahaadadaada OCES

Dhicitaaanka shahaadada OCES waxay ku qoran tahay shahaadada, shahaadada OCES waxaa loogu tala galay 4 sano.

4 asbuuc ka hor intii aysan kaa dhicin Nets DanID waxay kuu soo diraysaa email ama waraaq ay kuugu sheegayso inti aysan dhicin waad cusbooneysin kartaa adigoo isticmaaleya ti hore laakin hadi ay dhacdo ama lagaa xiro waa inaad dalbataa mid cusub.

4.5 Waajibaadka iyo masuuleyada ku saran marki lagu soo diro data ku saxiixan elektroniga

Hadi aad hesho data ku saxiixan elektronik tusaale ahaan waxaa is dhaafsaneysaa dekuumenriyo ama emailo ku saxiixan elektronik. Waa inaad hubisaa soo diraha OCES inay:

- Inay shageyneyso macnaheedo wxuu yahay inaysan dhaafin waqtia logu tala galay.
- Inaan la xirin macnaheedo wuxuu yahay inuusan qofkaas ku jirin liiska dadka laga xiray eek u qoran boga Nets DanID.
- Inuu adeecsan yahay sharciyada uqoran shahaadada OCES.

4.6 Masuuleyada saran Nets DanID ee xagaaga marki aad leedahay Shahaadada OCES

Hadi Nets DanID ay si qaldan u isticmaasho macluumaadkaaga shakhsiyadeed waxaa qabanayo sharciga u yaalo wadanka.

Nets DanID ma saarna masuuliyad hadi ay wax kaa soo gaaraan adigoon ilaalin sharciyada Nem ID.

Wixi magdhow ah ee aad ka rabto Nets DanID waa inuu noqdaa wax la xirira shahaadada OCES.

Sharciyada Nem Idga waxay hoos imanayaan sharciyada wadanka.

Hadi uu jiro is faham waa laguna xalin waayo wad hadal waxaa loo gudbinayaa maxkamada magaalada Copenhagen.

4.7 Masuuliyada saran Nets DanID ee xagaaga marka lagu soo diro data ku saxiixan elektronik

Nets DanID waxay masuul ka tahay wixi kaa dhimo hadi ay Nets DanID ay sameysay khalad laxirira diwann galinta soo saarsta ama xiritaanka Shahaadada OCES.

Nets DanID kama aha masuul hadi Nets DanID cadeyn karto inaysan wax qalad ah sameyn.

5. Warbixino siyaado ah

Hadi aad u baahan tahay faahfaahin siyaado ah oo ku saabsan Nem ID ama saxiira elektroniga waxaad la xiriri kartaa bankigaaga, Borger Service ama Nets DanID.

Isla markaana waxaad ka aqrisan kartaa www.nemid.un oo si fiican loogu faahfaahiyay.